

Waxa Aad Filanayso: Qoraalka Helitaanka Xarumaha Talaalka ee Gobalka Minnesota

[Warin]

Gobalka Minnesota wuxuu u heellan yahay inuu baxsho helitaanka xarumaha talaalka ee dadka Minnesota.

Muuqaalkaan wuxuu ku tusayaa waxa aad filan karto marka aad booqato xarunta talaalka bulshada.

Markaad soo gasho xarunta talaalka, waxaad arkaysaa boor kugu hagaya albaabka xarunta.

Qofka kusoo dhaweeya ayaa kaa cabiri kara heerkulka kaana codsan kara inaad badasho ama aad ku daboosha maskigaaga hore mid nadiif ah, oo la tuuri karo.

Shaqaalaha ayaa kugu xiri kara caawimaada aad u baahan tahay inta lagu jiro balanta talaalka. Dhammaan xarumaha talaalka ayaa leh caawimaada luuqada oo la heli karo.

Haddii aad qabto su'aal ama codsi gaar ah, wac xarunta xili hore.

[Qoraalka Shaashada] Booqo: mn.gov/covid19/vaccine/find-vaccine/community-vaccination-program/index.jsp si aad u hesho lambarada taleefanka ee xarumaha talaalka.

Xiliga gelitaanka, waxaa lagaa codsan karaa inaad tusto xaqiijinta balantaada. Waa la daabici karaa ama waxaad keeni kartaa xaqiijinta iimeelka ee ku jirta taleefankaaga.

Kadib markaad soo gasho, waxaad u baahan kartaa inaad laynka gasho kahor intaan lagu talaalin. U sheeg shaqaalaha gelitaanka haddii aad u baahan tahay kursi intaad laynka ku jirto.

U tag kalkaalisada marka mid la heli karo. Waxaad codsan kartaa asturnaan dheeraad ah haddii aad sidaas jeclaan lahayd.

Kalkaalisada ayaa ku siin doonta kaarka talaalka haddii tani tahay kuuradaada koobaad ee talaalka COVID-19. Kaarka dhigo meel amaan ah, soona qaado haddii aad u baahato kuurada labaad.

Kadib talaalkaaga, waxaa lagaa codsan doonaa inaad sugto 15 daqiiqo ilaa 30 daqiiqo si loo hubiyo inaad waxyeellooyin daran ka qaadin talaalka.

Shaqaalaha ayaa kuu sharxi doona waxa aad samaynayso haddii aad xanuunsato. Shaqaalaha tababaran sida kalkaalisoooyinka ama farsamo yaqaannada xaalada degdega ah ayaa u diyaarsan inay ka jawaabaan su'aalahaaga kuna siiyaan daryeel haddii aad jirato.

Marka sugitaankaaga 15 ama 30 daqiiqo dhamaado, waad dhamaysay!

Haddii noocaaga talaalku u baahan yahay kuuro labaad, xaqiiji inaad haysato balan kuu mudaysan oo cayiman.

Shaqaalaha xarunta jooga ayaa raadin kara balantaada labaad haddii aadan xasuusan taariikhda.

Waad ku mahadsan tahay qaadashada talaalka!

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan xarumaha talaalka, booqo webseedkeena
<https://mn.gov/covid19/vaccine/find-vaccine>.

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

5/26/21 (Somali)

Si aad u hesho macluumaadkan oo qaab ka duwan ah, wac: 651-201-4989